**Amarka L. 1 rep.**

**Aasaasida iyo shaqeynta Golaha Xeer-dejinta.**

**MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMALIYA**

**MAAMULHA**

Marka uu arkay dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga 9 Dicember 1952, lamba. 257;

Marka uu arkay qodobka 8 ee Heshiiska Ilaalinta dalka Somaaliya;

Marka uu arkay qod. 4 ee Bayaanka Mabaadiida Dastuuriga ee ku lifaaqn Heshiiska Ilaalinta;

Wuxuu go'aamiyay oo ansixinayaa Amarka soo socda:

**Qod. 1**

Golaha Dalka ee lagu dhisay Amarka lamba. 6 ee 31 Maarso 1955 waxaa loo bixiyay magaca ah Golaha Xeer-dejinta.

Xubnaha ka mida Golaha Xeer-dejinta waxaa loogu yeerayaa Xildhibaano.

**Qod. 2**

Golaha Xeer-dejinta fadhigooda ugu horreya waxaa isugu yeeraya Maamulaha muddada ku qoran qod. 2 ee dekereetada lr. 216 ee 1 Disember 1955.

**Qod. 3**

Xildhibaanka ugu da'da weyn ayaa qabanaya xilka guddoonka ku-meegaarka ah ee Golaha. Isagu wuxuu hagayaa hawlaha la xariira doorashada Guddoomiyaha.

**Qod. 4**

Guddoomiyaha waxaa lagu dooranayaa aqlabiyadda buuxda ee xildhibaanada.

Saddex doorasho ka dib haddii la gaari waayo aqlabiyadda buuxda, waxaa la samaynayaa doorasho kale waxaana la caddaynaya in uu guulaystay xildhibaanka hela codadka ugu badan. Haddi codadku ay isla ekaadaan, waxaa la dooranaya xildhibaanka ugu da'da weyn.

**Qod. 5**

Golaha Xeer-dejinta waxay dooranayaan laba Guddoomiye Ku-xigeen. Maamule hawlaha iyo laba ku xigeen iyo laba Xoghaye, kuwaaso marka lagu daro Guddoomiyaha, waxau noqonayaan Xaafiiska Guddoonka.

Xaafiiska Guddoonka, si uu xilkiisau guto,wuxuu magacaabayaa saraakiil iyo turjubanada.

**Qod. 6**

Golahu sharciyan wuxuu kulmayaa bilaha Abril iyo Oktoobar sanad kasta. Guddoomiyaha ayaa go'aaminaya taariikhda kulamada sidoo kale muddaynayaa hawl maalmeeda.

**Qod. 7**

Guddoomiyaha wuxuu isugu yeeri karaa Golaha kulan aan caadi ahayn marka ay weydiistaan sadex meelood laba meelood xubnaha uu ka koobanyahay Golahu ama Maamulaha marka ay jiraan xaalado deg-degga.

**Qod. 8**

Golaha wuxuu dhisayaa Guddiyo ka soo baaraandega hindise sharciyeedka xeerarka. Guddiyadu waa kuwa joogto ah oo gaara. Guddiyada joogtada ah waxaa la dhisayaa bilowga kal-fadhiyada waxayna xilka haynayaan inta uu uu socdo.

Guddiyada gaarka ah waxaa la dhisyaa kolba marka loo baahdo daraasadda mowduucyo cayiman. Guddidan waa kuwa joogto ah, Guddiyada Arrimaha Gudaha, Arrimaha Garsoorka, Arrimaha Maaliyadda, Arrimaha Dhaqaalaha iyo Arrimaha Bulshada

**Qod. 9**

Guddiyada waxay ka koobnyihiin tiro aan ka badnayn 9 xubnood kana yareyn 7. Dhismaha Guddiyada waxa oggolaanaya Golaha isaga ayaana magacaabaya xubnahiis.

Guddiyada fadhigooda ugu horreeya waxay ku magacaabayaan guddoomiyaha iyo xoghayaha iyago iska dhex magacaabaya.

Haddii ay jirto xaalad deg-degga Guddoomiyuhu wuxuu hordhigi karaa Golaha iyo Guddiyada joogtada, soo jeedimada xeerar xita aan ku jirin hawl-maalmeedka

**Qod. 11**

Go’aamadu si ay ansax u noqdaan Golaha iyo Guddiyada waxaa loo bahanyahay in ay ka soo qaybgalaan ugu yaraan kala bar iyo hal xubin inta ay ka koobanyihiin.

Hadddii aan si ka duwan Amarkaan ama xeer kale u sheegin go’aamada Golaha iyo Guddiyada waxaa qataa aqlabiyad ah kuwa haatan jooga.

**Qod. 12**

Codbixintu waxay u dhacaysaa magacyada oo la yeeriyo ama qaab sarajoog iyo fadhi. Waxay kaloo ku dhici kartaa qaab qarsoodi aha, marka laga soo tago marka xeerku ama nidaamku dalbayo, oo ay weydiistaan shan meelood xildhibaanada goob joogga ah.

**Qod. 13**

Daraasadda hindisa sharciyeedka Goluhuu qodob qodob ayuu u darsayaa, haddi isla Golahu aanu go’aansan in uu si isku duuban ugu dhawaaqo.

**Qod. 14**

Kulamada Golaha waa kuwa dadweynaha u furan. Waxayna noqonayaan kuwa qarsoodi ah haddii ugu yaraan shan meeloo hal xidhibanada goob joogga ah ama Maamulaha ay soo jeediyaan.

**Qod. 15**

Goluhu wuxuu ka garnaqayaa cinwaanada oggolaashaha xubnaha uu ka koobanyahay iyo sababaha ku soo kordha ee ku saabsan u qalmid la’aanta iyo la jaan-qaadis la’aanta xeerku jidaynayo.

**Qod. 16**

Xildhibaanada laguma qabsan karo fikradahooda ay qabaan iyo codadka ay bixiyeen inta ay xilalka gudanayeen. Sidoo kale qaadi dacwad ciqaaba haddii aan la helin oggolaashaha Golaha; lamana xiri karo ama sikastaba lagama qaadi karo xorriyadda shaqsiga, lamana baari karo shaqsiyan ama deegaankooda, marka laga reebo mararka lagu qabto iyagoo dambiga faraha kula jira ayna qasab tahay markaas in loo gooyo warqadda qabashada; lamana xiri karo ama lama hayn karo iyado la fulinayo xukun hore oo dhaqangalay.

**Qod. 17**

Marka ay dhacdo istiqaalad, mudda dhaaf ama geeri oo ay bannaanaato goob doorasho, waxaa lagu dhawaaqayaa in uu guulaystay tartamaha ku xigay ee liistada doorashada xidhibaanka jagada banneeyay. Haddii wax kale si bannaanadan waxaa la qabanay doorasho qayb ahaaneed oo Maamuluhu ku soo saarayaa dekereeto lagu qabanayo doorasho qayb ahaaneed.

**Qod. 18**

Halbeegga lagu jaangooynayo gunnada Golaha waxaa lagu jidaynayaa xeer.

**Qod. 19**

Maamuluhu wuxuu amar ku bixin karaa xeer lagu kala diro Golaha haddii aysan fulin karin howlahooda ama u fuliyo si caqabad ku ah howlaha caadiga ah ee sharci dejinta.

Dekereetada lagu kala dirayo waa in lagu sheegaa doorashada cusub ee la qabanyo muddo aan ka yarayn sagaashan cisho isla markaana aan ka badnayn boqol iyo labaatan cisho oo ka bilaabata taariikhda lakala diray.

**Qod. 20**

Wixii aan lagu sheegin amarkaan ama xeer kale, habsami u socoda Golaha waxaa lagu dhaqayaa nidaam Goluhu meelmariyo oo uu soo jeediyo Maamulaha

Muqdisho, 5 Jannaayo 1956.

Maamulaha

**Anzilotti**